



Kaabisaha Darveelka Caruurta
Tilmaamaha Lacag Dalicida Iyo Bixinta Kharashka
Qoyska, Asxaabta Iyo Jaarka/Guriga Dhexdiisa/
Bixiyayaasha Qaraabada Ah



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Taariikhda Rasmiga ah: Noofember 2019 | Taariikhda Dib u Eegida Lagu Sameeyay: Julaa 2021
U Qalanka iyo Taageerada Bixiyaha | Loo Ansixiyay Qaybinta Maamulka Ku Xigeenka Child Care Subsidy



Tusmada Qoraalka

| | |
|---|----|
| Hordhac | 1 |
| Barnaamijka Kaabista Daryeelka Ilmaha (CCSP)..... | 1 |
| Barnaamijka Kaabista Daryeelka Carruurta Xidhiidhada Shaqaynaya..... | 1 |
| Daryeelka Ilmaha Barnaamijka Samofalka Ilmaha | 1 |
| Ururka Shaqaalaha Caalamiga ah ee Shaqaalaha Adeega Gudaha | 1 |
| FFN/Guri Dhaxdiisa/Kaalinta iyo Masuuliyada Bixiyaha Qaraabada ah | 2 |
| Waajibaadka DCYF..... | 2 |
| Waajibaadka Qoyska | 3 |
| Nidaamka U Qalanka Daryeelka Ilmaha | 3 |
| La socodka iyo Dalabka Xaadiriska Maalintii ee FFN | 4 |
| La Socodka Xaadiriska Maalintii | 4 |
| Dalabka Sixitaanka..... | 4 |
| Gudbinta Dalabka ee Bixinta Lacagta | 7 |
| Helitaanka Lacagta..... | 7 |
| Xadiga Daryeelka Ilmaha ee Laxaadka La' | 8 |
| Heerka 1..... | 8 |
| Heerka 2..... | 9 |
| Khaladaadka Lacag Bixinta | 9 |
| Khaladaadka Lacag yar Siinta | 9 |
| Khaladaadka Lacag Badan Siinta | 9 |
| Macluumaadka Cashuurta..... | 10 |
| Ku Xadgudubka Barnaamijka | 11 |
| Ilaha | 11 |
| Macluumaadka Xidhiidhka..... | 11 |
| Macluumaadka Onleynka ah..... | 12 |

Hordhac

Tilmaamahani waxay bixiyaan macluumaad ku saabsan dalabka Child Care Subsidy ee lacagta iyo lacagta Qoyska, Asxaabta, iyo Jaarka (Family, Friend, and Neighbor, FFN)/Guriga Dhexdiisa, Bixiyayaasha Qaraabada ee Kale. Tilmaamahan waxaa sameeyay oo haynaya Washington State Department of Children, Youth & Families (DCYF). La hadal Khadka Bixiyaha 1-800-394-4571 hadii aad u baahan tahay kaalmo luuqad kale. Turjubaan ayaa kusoo biiri kara taleefanka.

Tobobarka kharashkiisa la kaabo waad heli kartaa oo waxa loo baahan yahay ugu yaraan hal mar noloshu Ururka Shaqaalaha Adeega (Service Employees International Union, SEIU) 925 Heshiiska Gorgortanka Wada Jirka (Collective Bargaining Agreement, CBA) 2021-2023. Waxaa lagu heli karaa adiga foolka-fool (Ingiriisi, Isbaanish, ama Somali), onleyn ahaan (Ingiriisi ama Isbaanidh), ama waraaqaha iska ah (Ingiriisi ama Isbaanish). Waxa aad dalban kartaa lacagta ilaa \$20 kadib marka aad dhamaystirto. Kala soco tobobarkaaga duwaanka xaadiriska si aad ugu xoojiso dalabkaaga. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan tobobarka iyo gunooyinka kale adiga oo kala hadlaya SEIU 925 1-877-734-8673. Waxa aad iimeel u diri kartaa bowens@whatcom.edu ama la hadal 360-383-3174 si aad u duwaan geliso.

Barnaamijka Kaabista Daryeelka Ilmaha

Barnaamijka Kaabista Daryeelka Carruurta Xidhiidhada Shaqaynaya

WCCC waxa ay ka caawisaa qoysaska u qalma daryeelka si markaa waalidka ay uga qayb galaan hawlaha sida shaqada, tobobarka, barnaamijka waxbarasho iyo hawlaha macmiilka ee Kaalmada Kumeel Gaadhka ah ee Qoysaska Baahan (Temporary Assistance for Needy Families, TANF). Shakhsiyadka waxaa loo ansixin karaa inay bixiyaan daryeelka ilmaha bixiye FFN ahaan iyo inaad hesho qoysaska u qalma ee WCCC.

Daryeelka Ilmaha Barnaamijka Samofalka Ilmaha

Shakhsiyadka adeegyada lagu siinayo Waalidka Koriye ee Shaqeyaya (Employed Foster Parent, Child Protective), Ilaalinta Ilmaha (Child Welfare), iyo barnaamijyada Samofalka Ilmaha ee u qalma inay helaan kaalmada bixinta lacagta adeegyada daryeelka. Shaqaalaha bulshada ee Samofalka Ilmaha lagu qoray ayaa buuxinaya u qalanka, ansixinta bixiyaha FFN, iyo ogolaanshaha bixinta lacagta. Shakhsiyadka waxaa loo ansixin karaan inay bixiyaan daryeelka ilmaha bixiyaha FFN ahaan oo ay helaan lacagta Waalidka Koriyaha Shaqeyaya iyo Ilaalinta Ilmaha iyo barnaamijyada Samofalka Ilmaha.

Ururka Shaqaalaha Caalamiga ah ee Shaqaalaha Adeega Gudaha (SEIU)

SEIU Local 925 (SEIU 925) waxay matashaa Bixiyayaasha Guriga Qoyska Liisanka Haysta (Licensed Family Home, LFH) iyo FFN ee qaata kaabista barnaamijyada CCSP, Waalidka Koriyaha Shaqeyaya, iyo Ilaalinta Ilmaha iyo Samofalka Ilmaha. CBA waxay ka heshiiday SEIU iyo gobolka Washington waxa uuna dhigayaa bixinta iyo gunooyinka xubnaha SEIU 925. Si aad wax uga ogaato gunooyinka gaarka ah sida gudida kharashka tobobarka iyo waxbarashada, kala hadal SEIU 925 1-877-734-8673.

Marka laga helo ogolaanshaha munaasabka ah ee xubinimada ururka, xubnuhu waxay bixin karaan kharashka ururka ee 2% ee adeegyada daryeelka ilmaha oo uu bixiyo kharashkiisa gobolku. Waxaa la qaataa ugu badnaan \$50 bishii.

CBA waxaa lagu heli karaa onleyn ahaan ofm.wa.gov/sites/default/files/public/labor/agreements/21-23/nse_childcare.pdf.

FFN/Guri Dhaxdiisa/Kaalinta iyo Masuuliyada Bixiyaha Qaraabada ah

Bixiyaha daryeelka ilmaha FFN ahaan, waxaad leedahay kaalin gaar ah oo aad ku daryeelayso caruurta. Hadii aad tahay qaraabo ama saxiib dhaw ama jaar, waxa aad siin kartaa deeqaan xasiloon, caafimaad qaba oo amaan ah caruurta. DCYF waxaa ka go'an inay ka caawiso taas iyada oo abuuraysa shuruuca aas aasiga ah iyo masuuliyada dhamaan bixiyayaasha.

Tilmaamahani waxay kaa caawinayaan inaad fahanto kaalintaada iyo masuuliyadahaaga kaydinta xaadiriska iyo dalbashada lacagta sida sax ah. Sidoo kale, kuwa soo socdaa waxaa weeye masuuliyada qaar kamid ah oo muhiim ah oo ay tahay in aad raacdo:

1. Bixinta daryeelka, kormeerka, iyo hawlaha maalintii kuwaas oo ku salaysan baahiyaha hormarka ilmaha, oo ay ku jiraan caafimaadka, amaanka, jidhka, nafaqada, dareenka, garaadka, iyo baahiyaha bulshada.
2. Waxa ay ku bixiyaan daryeelka ilmaha meelo la ansixiyay; asxaabta iyo jaarka (aan qaraabada ahayn) waa inay ku bixiyaan daryeelka ilmaha guriga ilmaha.
3. Gaadhsii wixii isbadal ah ee magaca sharciga ah, cinwaanka, lambarka taleefanka, ama macluumaadka kale ee xidhiidhka DCYF 10 maalmood gudahood dcyf.ffn@dcyf.wa.gov ama 1-866-482-4325, ikhtiyaarka 8.
4. Waxa aad qoysaska u suurto gelisaa inay heli karaan caruurtooda mar kasta inta aad hayso.
5. Waa inaad haysataa taleegan leh adeega la hadalka gurmada degdega ee 9-1-1 kaas oo la diri karo lanasoo hadli karo wakhti kasta inta aad caruurta hayso.
6. Buuxinta shuruudaha iyo shuruudaha kaabista daryeelka ilmaha.
7. Haynta duwaanada buuxa ee sax ah mudo shan sano ah.

Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) waxaa ku jira shuruuc la ansixiyay oo kharash dalicid ah oo FFNs loogu talo geley. Ka eeg Barnaamijka WAC 110-15 Working Connections and Seasonal Child Care Subsidy: apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-15 iyo daryeelka ilmaha ee Bixiyayaasha WAC 110-16 License Exempt Care- Family, Friends, and Neighbors/In-Home/Relative: apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-16.

Waajibaadka DCYF

- Khabiirada Waxyaabaha Laga Soo Reebeey Liisanka waxay kaala shaqaynayaan:
 - Buuxinta shuruudaha baadhitaanka taariikhda hore
 - In la ogaado ansixinta hore bixiye FFN ahaan
 - La socodka ansixinta joogtada ah
- Ogaanshaah iyo qoraalka siyaasada iyo shuruudaha u qalanka CCSP
- Siinta CBA ee LFH iyo FFN bixiyayaasha ah
- Gaadhsiinta dawlada federalka ah Washington CCSP
- Hanti dhawrista iyo duwaanada kharash dalicida si loo qiimeeyo hadii ay jirto lacag badan ama yar oo la bixiyaya
- Waxa uu siiyaa qoysaska iyo bixiyayaasha ugu yaraan 10 maalmood wargelin ah marka la yaranayo ama la joojinayo gunooyinka kahor inta ayna dhamaan taariikhda hore ee wargelinta Adeega Bixinta Lacagta Adeega Bulshada (Social Service Payment Service, SSPS)
- Waxa uu si toos ah ula shaqeeyaa qoysaska si loo ogaado u qalankooda adeegyada daryeelka ilmaha
- Waxa uu u ogolaadaa oo uu u diraa lacagta child care subsidy bixiyayaasha
- Waxa uu ka jawaabaa su'aalaha la xidhiidha u qalanka qoyska, ogolaanshaha, iyo bixinta lacagta

Waajibaadka Qoyska

Qoyska dalbada ama hela gunooyinka CCSP waxaa saaran masuuliyadaha oo shardi u ah qaadashada gunooyinkan. Waxaa taas kamid ah, laakiin kuma koobna:

- Buuxinta nidaamka arjiga iyo gudbinta foomamka xaqiijinta ee loo baahan yahay ee loogu baahan yahay si loo ogaado u qalanka
- Bixinta ama samaysashada qorshaha bixinta qaybta bishii uu qofku iska bixiyo
- Ku duwaan gelinta xaadiriska ilmaha nidaamka xaadiriska ama waa inuu qof loo ogol yahay keenaa oo uu ka kaxeeyaa ilmaha
- Ka warbixinta wixii isbadal ah ee bixiyayaasha ah mudo shan maalmood ah gudahood
- Dalabka daryeel dheeraad ah oo hawsha la ansixiyay ah

Nidaamka U Qalanka Daryeelka Ilmaha

- A. Shakhsiyaadka doonaya inay gacan ka gaystaan bixinta daryeelka ilmaha waxay dalban karaan:
- La hadalka Xarunta Xidhiidhka Kaabista Daryeelka Ilmaha (Child Care Subsidy Contact Center) ee gobolka oo dhan ee DCYF 1-844-626-8687
 - La xidhiidhida shaqaalaha bulshada Samofalka Ilmaha u igmatay
 - Buuxinta arjiga onleynka ah ee www.WashingtonConnection.org
- B. DCYF waxay uruurisaa oo ay naqdidaa macluumaadka si loo ogaado u qalanka qoyska.
- C. Marka u qalanka la ogaado ee CCSP, qoysasku waxay heli doonaa warqad DCYF ka socota. Warqada u qalanka waxaa ku jira taariikhda bilawga iyo dhamaadka u qalanka iyo xadiga bishii ay dadku iska bixinayaan.
- D. Qoysaska u qalma waxay isticmaali karaan Answer Phone (1-844-626-8687) si ay ula socdaan arjiga daryeelka ilmaha iyaga oo riixaya 1 kadib marka ay la hadlaan Xarunta Xidhiidhka CCSP. Qoysaska waxaa looga baahan yahay lambarkooda aqoonsiga macmiilka ama Lambarka Amaanka Bulshada oo waxay eegi karaan:
- Hadii arjigoodii la ansixiyay, diiday ama weli la sugayo
 - Xaalada waraaqaha soo gaadhay DCYF
 - U qalanka taariikhaha ay bilaabmayaan oo ay dhamaanayaan
 - Adeegyada daryeelka ilmaha waa la ogolaaday
 - Xadiga qoysku iska bixinayo
- E. Bixiyayaashu waxay sidoo kale eegi karaan xaalada arjiga qoyska iyada oo la isticmaalayo Taleefanka Macluumaadka Working Connections (Working Connections Information Phone, WCIP) (1-866-218-3244). WCIP waxaa lagu heli karaa 24 saacadood maalintii, todobaad maalmood todobaadkii Ingiriisi iyo Isbaanish. Si aad u isticmaasho WCIP, waxaad u baahan doontaa:
- Lambarka bixiyaha daryeelka ilmaha SSPS
 - Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha (Employee Identification Number, EIN)
 - Lambarka arjiga qoyska waxaa laga heli karaa wargelinta SSPS
- Maadaama oo ay jirto sir, macluumaadka qoyska qaar waxaa dhici karta in aanad heli karin. WCIP waxay kuu ogolashay inaad eegto waxyaabaha soo socda:
- Xaalada arjiga – la ansixiyay, diiday, sugayo, xidhay, ama liiska sugayaasha la geliyay
 - Taariikhda uu bilaabmayo adeegu
 - Adeegyada daryeelka ilmaha ee la ogol yahay
 - Xadiga qoysku iska bixinayo bishii
 - Wixii fariin gaar ah ee la xidhiidha barnaamijyada kaabista
- F. DCYF waxay u dirtaa qoysaska bushqad kahor inta ayna dhamaanin mudada u qalanku. DCYF ma bixinayso lacagta daryeelka kahor mudada u qalanka ee qoyska la ogaaday inay u qalmaan.

Qoysaska ayaa ka masuul ah inuu bixiyo kharashka adeegyada daryeelka ilmaha ee inta aanay u qalmin iyada oo ayna ka caawinaynin DCYF. U qalanka daryeelka ilmaha taariikh hore loogama dhigo qoysaska dib u dalbanaya kadib marka mudada ay u qalmaan ay dhamaato.

La socodka iyo Dalabka Xaadiriska Maalintii ee FFN

Bixiye ahaan FFN, waxaa lagu ogol yahay xadi lacageed oo saacadii ah iyo saacado gaar ah bil kasta oo ilmo kasta oo u qalma daryeelka ah. Xadiga saacadii ee gobolku waa isku mid dhamaan caruurta. Hadii xadigaaga gaarku uu ka duwan yahay, gobolka ayaa bixin doona kolba ka yar labada. Si aad u aragto xadiga saacadii ee FFN ee gobolka, waxa aad ka eegtaa CBA

www.ofm.wa.gov/sites/default/files/public/labor/agreements/21-23/nse_childcare.pdf.

Waxa aad ka eegi kartaa [WAC 110-15-0034](#) iyo [110-16-0015](#) marka aad dalbanayso lacagta. Si aad u dalbato oo aad u hesho xadiga saxda ah bil kasta, waa inaad raacdaa shuruucda iyo nidaamka hoose.

La Socodka Xaadiriska Maalintii

Waa inaad isticmaashaa Nidaamka Electronic Attendance ee ay bixiso DCYF ama aad isticmaashaa nidaamka electronic attendance oo cid kale leedahay oo DCYF ay ansixisay. Marka aad isticmaalayso nidaamka electronic attendance, qoyska, ama qoyska qoysku u igmadeen, waa inuu ku duwaan geliyaan imaatinka iyo tegitaanka ilmaha ee bixiyaha daryeelka ilmaha electronic attendance nidaamka.

Macluumaadka ku saabsan electronic attendance waxaa laga heli karaa

www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system.

Hadii ay ansixiso DCYF in la isticmaalo duwaanka xaadiriska ee waraaqaha ah, qoysasku waa inay ilmo kasta saxeexaan marka uu yimaado iyo marka la kaxaynayo, iyada oo saxeexaya oo ku qoraya saacadaha keenista iyo kaxaynta.

Bixiyayaasha isticmaala nidaamka gobolka, waa inaad kusoo gudbisaa dhamaan xaadiriska maalin walba nidaamkaaga elektorooniga ah kahor inta aanad u dirin dalabka SSPS ee bixinta. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan isticmaalka nidaamka gobolka, waxa aad ka eegtaa buuga nidaamka ee

<http://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/EASManual.pdf>.

Dalabka Sixitaanka

DCYF waxay diraysaa waraaqaha soo socda marka aad u ansixiso lacagta child care subsidy:

1. Warqadaha Ogolaanshaha Bixiyaha, oo ay ku qoran yihiin xadiga bishii qoysku iska bixinayo, hadii ay jirto, ee adiga lagugu leeyahay bishii
2. Wargelinta Adeega Bulshada
3. Qaansheegta bishii ee dalabka lacagta
4. Risiidhka bishii ee lacagta (sheegida xawilaada)

Hadii waraaqaha ay la socdaan wax khaladaad ahi oo waxyaabaha soo socda ah, la hadal Khadka Bixiyaha DCYF ee 1-800-394-4571 si aad u saxdo:

1. Macaga bixiyaha iyo lambarka bixiyaha SSPS
2. Ansixinta Adeegyada
3. Magaca ilmaha
4. Lambarka qaybta (saacadaha) iyo xadiga saacadaha ee bil kasta
5. Bilawga iyo dhamaadka ogolaanshaha
6. Xadiga qoysku iska bixinayo bishii

Waxaad sidoo kale heli doontaa Wargelimaha Adeegyada Bulshada marka ay jiraan wax isbadal ah oo ogolaanshaha ah ama marka ilmahaaga ay dhamaato kaabistiisu. Si aad ugu hesho wargelinta iimeel wixii bilawga ogolaanshaha, isbadalka, ama taariikhda dhamaadka, waxa aad la xidhiidhi kartaa Khadka Bixiyaha DCYF ee 1-800-394-4571 ama providerhelp@dcyf.wa.gov oo waxa aad siisaa cinwaan iimeel. Macluumaad badan ka oggow SSPS www.dcyf.wa.gov/services/ssps.

Qaansheegta waxaa lagu dariyaa Boosta Maraykanka caadiyan kahor maalinta ugu danbaysa bil kasta. Qaansheegta kowaad ee ogolaanshaha cusub waxaa dhici karta inay soo gaadho ilaa badhtamaha bisha xigta. Waxa aad sidoo kael ka heli kartaa qaansheegaga Daaqada Bixiyaha Websaytka SSPS.

Marka aad hesho qaansheegta, waxa aad akhridaa duwaanadaada electronic attendance si aad eegtaa tirada maalmaha (saacadaha) ee lagu sheegey dalabka lacagta ee xaadiriska ilmahaaga oo ogolow. Saacadaha iyo adeegyada daryeel kasta ee sida saxda ah ee dalabka lacagta waxaa kamid ah kuwa soo socda:

Saacadaha Rasmiga ah ee Daryeelka La Siiyay Ilmo Kasta

Waxaa lagu ogol yahay inaad dalbato lacagta saacadaha rasmiga ah ee daryeelka aad siisay ilmo kasta. Si aad u dalbato saacadaha rasmiga ah ee daryeelka aad siisay ilmaha, waxa aad buuxisaa sanduuqa qaansheegta ee ay ku qoran tahay "units (qaybaha)" ilmo kasta. Waxa aad ka dhigtaa lambarka ugu dhaw wixii jajib ah wadarta tirada saacadaha ee daryeelka aad bixisay bishaas. Tirada waa in laga dhigaa tirada buuxda ee u dhaw bishi, maaha maalin kasta ama todobaad kasta. Tusaale ahaan, hadii wadarta bishii ay tahay 99.5 oo saacadood, waxa aad dalban kartaa lacagta 100.

- Ma dalban kartid lacagta wax ka badan 16 saacadood oo daryeel ah maalin kasta ilmo kasta
- Ma dalban kartid lacagta wax ka badan lix caruur ah isku wakhti isku saacado daryeelka ah
- Ma dalban kartid lacagta daryeelka aanad runtii bixin. Haddii uu ilmahaagu uu ka maqan yahay daryeelkaaga, waa inaanad dalban lacagta sadex saacadood
- Ma dalban kartid kharashka daryeelka si joogtada ah uga dhaca goobtaada ee aan ahayn daryeelka loo ansixiyay inuu qabsoomo. Tusaale ahaan, hadii lagu ogolaaday inaad ku bixiso daryeelka kaliya guriga ilmaha, laguuma ogola inaad ku siiso daryeelka gurigaaga

Kharashka Safarada Waxbarasho/Hormarinta Tayada

Marka aad jeebkaaga ka bixiso si markaa ilmuhu uu uga qayb qaadan karo safarka shaqo ama hawsha hormarinta tayada, DCYF waxay dib kuu gudi doontaa kharashka aad gashay. Dib u gudistu waxay noqon kartaa ilaa \$30 ilmihii bishii, iyada oo aan la eegeynin da'da.

Kharashka safarka waxbarasho/hormarinta waxaa lagu bixiyaa hawlaha gaarka ah, sida:

- Kharashka lagu heleyo meelaha sida beerta xayawaanka, carwada, filimaanta, iyo barkada dabaasha
- Barnaamijyada xoojinta iyo duruusta joogtada ah sida fasalada luuqada, duruusta jimicsiga, iyo dabaasha
- Gudista kharashka gaadiidka shacabka ama shidaalka ee xadiga gudista OFM mileage (waxa lagaa dalban karaa in aad keento risiidhka si kharashka loo xaqiijiyo)
- Kharashka adeega, sida kiraysashada kilawn, booni, wax la raaco, iyo bandhig muusig
- Iibsiga manhajka waxbarashada dugsiga kahor
- Manhajka uu sameeyay bixiyuhu ee ay DCYF ansixisay

Kharashka safarka waxbarasho/hormarinta laguma bixinayo:

- Kharashaadka ama kharashka ay ku galayaan dadka waawayn ee safarka waxbarasho la socda
- Agabka ama qalabka loogu baahan yahay in lagu buuxiyo shuruudaha liisanka

- Cuntada inta safarka lagu jiro la iibsado

Si aad ugu dalbato lacagta sida saxda ah ee gudista kharashka hawsha safarka waxbarasho ama hormarin:

1. Waxa aad dalbataa kharashka rasmiga ah, waxa aad ka dhigtaa wixii jajab ah tirada ugu dhaw ee xadiga lacagta ee kharashka rasmiga ah ee aad ku bixisay hawsha safarka waxbarasho ama hormar ee wixii ka yar \$30. Tusaale ahaan, hadii kharashku uu yahay \$10, waxa aad gelisaa "\$10" Qaybaha Wadarta ee sanduuqa qaansheegta
2. Ha dalban lacagta kharashka safarka waxbarasho/hormarka hadii aanu ilmuhu ka qayb gelin. Markan oo kale, waxa aad heli kartaa "0" Qaybaha Wadarta ee sanduuqa ilmahaas qaansheegtiisa
3. Waxa aad haysaa qaansheegta ay ku taalo kharashka safarka shaqo/hawlaha hormarinta iyo liiska caruurta ka qayb gashay
4. Marka ay dalbato DCYF, waa inaad soo gudbisaa risiidhka 45 maalmood gudahood marka aad dalbato. Hadii aanad ku keenin duwaanka 45 maalmood, xadiga lacagta dheeraadka ah waxaa dhici karta in lagu qoro inta dhan ee aad dalbanaysay bishaa

Hadii ay kaaga bixi doonto wax ka badan \$30 ilmaha safarka waxbarasho ama hormarinta tayada hawlaha ah bisha, waxa aad ka dalban kartaa qoysaska qaata kaabista daryeelka ilmaha inay bixiyaan wixii kharash ah ee dheeraad ah. Hadii waalidku sheego in aanu bixinaynin kharashka dheeraadka ah, waxa aad ka joojin kartaa ilmaha safarka waxbarashada ah ama waxa aad ka qayb gelin kartaa hawsha hormarinta tayada. Sanad kasta (Julaay 1 ilaa Juun 30keeda) waxaa jira lacah yar oo lagu bixiyo kharashka safarka waxbarasho/hormarin. Hadii ay lacagtu dhamaato kahor dhamaadka sanadka, kharashka safarka waxbarasho/hormarinta lama bixinayo.

Qaybta Qoysku Bixinayaan Kharashka

Badanaa qoysasku waa inay bixiyaan qoys kharashka daryeelka ilmaha bishii. Qoyska ayaa ka masuul ah qaybta ay iska bixinayaan bil kasta. Qoysku waxay qaybta ay bixinayaan siin karaan bixiye kale, ama waxay u qaybin karaan dhawr bixiyaal. Hadii lagu qayb kharashka, oo aanad helin lacag, waa inaad kaga soo warbixisaa 60 maalmood gudahood oo aad soo gaadhsiisaa Khadka Bixiyaha DCYF 1-800-394-4571 ama iimeelka providerhelp@dcyf.wa.gov.

Saacadaha Daryeelka Fasaxyada Dugsiga/Saacadaha Dhigaalka ah

Saacadahan waxaa weeye wakhtiga marka caruuta gaadhay da'da waxbarashada ayna wax dhigaynin, sida marka hore looso daayo iyo maalmaha uu xidhan yahay dugsigu. Sanad dugsiyeedka, waxaad dalban kartaa lacagta 35-70 saacada Daryeelka Fasaxa Dugsiga bil kasta. Inta lagu jiro fasaxa xagaaga ee Juun, Julaay iyo Agoosto, waxaa jira ilaa 115 oo saacadood bil kasta. Si aad u dalbato saacadahan dheeraadka ah, buuxi sanduuqa qaansheegta Adeegyada SSPS ee ay ku qoran tahay "School Holiday Care (Daryeelka Fasaxa Dugsiga)."

OGOW: Wadarta saacadaha ee daryeelka la dalbaday lacagtiisa, oo ay ku jiraan saacadaha fasaxa dugsiga, kama badan karaan wadarta saacadaha ee daryeelka ee la bixiyay bishaas. Kaliya waxaa la isticmaalayaa "Daryeelka Fasaxa Dugsiga" ee ku qoran qaansheegta hadii saacadaha daryeelka la bixiyay (oo ay ku jiraan saacadaha dugsigu fasaxa yahay) oo ay ka badan yihiin saacadaha caadiga ah ee la ansixiyay.

Saacadaha Baahiyaha Gaarka ah

Eeg Qaybta Baahiyaha Gaarka ah ee boga 7 ee tilmaamahan.

Ansixinta Adeegyada Hal Mar

Adeegyada halka mar lagu ogolaaday waxaa weeye waxyaabaha sida gudista ama gunada tobobar ama waxbarasho.

Gudbinta Dalabka ee Bixinta Lacagta

Waxaa jira dhawr dariiqo oo aad ugu gudbin karto saacadahaaga si aad uga hesho lacagta DCYF. Kahor inta aanad gudbin qaansheegtaada, waxa aad ku buuxisaa saacadaha daryeelka aad siisay ilmo kasta qaansheegta, saxeex oo ku qor taariikhda. Waxaa jiri doona tilmaamo lagu siiyay qaansheegta boosta laguugu soo diray ee ikhtiyaar kasta. Waa inaad ku gudbisaa lacagta saacadaha sadex bilood gudahood oo taariikhda qaansheegta ah.

Gudi qaansheegtaada adiga oo isticmaalaya **kaliya hal** kamid ah ikhtiyaarada soo socda:

Boostada

Waxa aad boosta ugu dirtaa nuqulka qaansheegta aad buuxisay DCYF:

Washington State Department of Children, Youth & Families

SSPS

P.O. Box 45812

Olympia, WA 98504-5812

Telefoon

Kala hadal Invoice Express 1-888-461-8855. Tilmaamaha sida loo isticmaalayo Invoice Express waxay ku jiraan www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0043.pdf.

Daaqada Websaytka SSPS

Tilmaamaha sida aad u geli karto oo aad isku duwaan gelin karto daaqada bixiyaha websaytka SSPS waxaa laga heli karaa www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/SSPSPortalRegistration-SAW.pdf.

Waxaa jira sadex qaybood oo muhiim ah oo ay tahay inaad ka buuxsato gelitaanka:

- Qaybta 1: Ka samayso xisaab Secure Access Washington (SAW) secureaccess.wa.gov
 - Hadii aad mushkilad kala kulanto samaysashada xisaabta SAW, waxa aad kala hadashaa adeega macmiilka SAW 24 saacadood, todoba maalmood todobaadkii, 1-855-928-3241
- Qaybta 2: Isduwaan Gelinta Daaqada Bixiyaha
- Qaybta 3: Ku Biirida Dhaqan Gelinta Ogolaanshaha

Helitaanka Lacagta

Waxa aad dooran kartaa inaad kaga hesho lacagta DCYF boosta ama inay toos bangiga kuugu soo shubaan. Laga bilaabo Julaay 1, 2019, dhamaan bixiyayaasha waxaa lacagta loogu shubayaa bangiga. Hadii aanad lahayn hay'ada maaliyadeed, waxa aad soo gudbin kartaa dalabka qoran oo aad ku sheegeyso inaad doonayso in lacagta laguugu soo diro Adeega Boosta Maraykanka.

Boostada

Dalabka qaansheegta ee u dhaxeeya 1da iyo 4:30 galabnimo ee 15ka waxaa la diri doonaa 16ka ama maalinta kowaad ee shaqo ee ku xigta. Hadii 15ku uu ku dhaco maalin fasax ah ama ciid ah, waxaa laga jari doonaa 4:30 galabnimo, ugu yaraan maalinta ugu danbaysa ee ganacsi kahor 15ka.

Dalabka qaansheegta ee la gudbiyay wixii ka danbeeya 4:30 galabnimo ee 15ka ilaa 4:30 galabnimo ee maalinta shaqo ee ugu danbaysa bisha waxaa la bixin doonaa maalinta kowaad ee shaqo ee bisha xigta.

Lacagta lagu bixiyay boosta waxau geleysaa Adeega Boosta Maraykanka ilaa sadex maalmood kadib marka la diro. DCYF ma damaanad qaadi karto taariikhda ay gaadhayaan jeegaga lagu diray Adeega Boosta Maraykanka.

Waxa laga geli karaa taariikhda oo muujinaysa taariikhaha la dalbanayo lacagta iyo bixinta (jeega) u dhigta ee taariikhaha boosta www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/SSPS-WarrantIssuanceCalendar.pdf.

Ku Shubista Bangiga

Qaansheegta loo gudbiyay in toos loogu shubo bangiga waxaa laga shaqeyaa maalinta ugu danbaysa bisha qaansheegta ama taariikhda gudbinta, kolba ka danbeeya. Lacagta waxaa lagu shubi doonaa bangiga 3-5 maalmood oo shaqo kadib taariikhda qaansheegta laga shaqeyay.

Wixii xisaabta ku shubida bangiga ee cusub ama samaynta waxka badalka xisaabta aad hore u leedahay, waxa aad marka hore buuxin karaan Duwaanka Ku Shubida Bangiga/foomamka W9 si elektoroonig ah (onleyn laga heli karo www.dcyf.wa.gov/services/ssps/direct-deposit), oo kadibna daanaco oo boosta ama faakis ugu dir foomamka:

SSPS Provider File Unit
P.O. Box 45812
Olympia, WA 98504
Fakiska: 360-902-8268

Ka dalbo nuqul waraaqo ah oo bushqada arjiga ah DSHSSSPSWeb@dshs.wa.gov ama adiga oo la hadlaya 360-664-6161 (Ikhtiyaarka 1). Waxa aad xaqiijisaa inaad u sheegto SSPS hadii ay tahay xisaab cusub ama in la badalo mid hore u jirta.

Miyaad u baahan yahay in lagaa caawiyo buuxinta foomamka? Akhri Tilmaamaha Duwaanka Ku Shubida Bangiga Tooska ah onleyn ahaan ee ku jira ofm.wa.gov/it-systems/accounting-systems/statewide-vendorpayee-services/vendorpayee-direct-deposit.

Xadiga Daryeelka ilmaha ee Laxaadka La'

Xadiga laxaad la'aanta waxaa weeye daryeelka la siiyo ilmaha qaba baahi ka badan inta caadiyan ee daryeelka caadiga ah ee maalintii. DCYF ma bixiso kharashka tobobarka, wax ka badalka dhismaha, ama qalabka.

Waxa lagu siin karaan xadi dheeraad ah oo daryeelka ah caruurta iyo dadka dhalinyarta ah:

- a. Ilaa 19 jir ee la ogaaday inay qabaan xaalad jidh, maskax, dareen, ama habdhaqan oo u baahan daryeel gaar ah oo sare; ama
- b. Da'da 13 ilaa 19 oo kormeer maxkamadeed ku jira

Daryeelka ilmaha laxaadka la' waxaa loo ansixiyaan Heerka 1 ama Heerka 2. Xadiga laxaad la'aanta waxaa lagu bixiyaa si ka dheeraad ah xadiga saacadii ee daryeelka ilmaha gobolka oo waxaana la diraa qaansheegta daryeelka saacadii ee qorshaysan.

Heerka 1

Heerka 1 ogolaanshaha ah waxaa loogu talo geley xadiga laxaad la'aanta gobolka. Kahor inta aan la ansixin xadiga laxaad la'aanta Heerka 1, adiga iyo qoyskaagu waa inaad buuxisaan foomka Dalabka Xadiga Daryeelka Ilmaha Laxaadka La', oo laga heli karo

www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/word/Special_needs_request.docx. Foomamka waa in la saxeeexo oo loogu diraa boosta ama faakis ahaan DCYF:

Child Care Subsidy Contact Center
P.O. Box 11346
Tacoma, WA 98411-9903
Fakiska: 1-877-309-9747

Heerka 2

Qoysku waxa uu kala shaqeeyaa adiga iyo DCYF si loo ogaado hadii ilmahoodu uu u qalmo Heerka 2 ee xadiga laxaad la'aanta. Marka laga tago foomamka Dalabka Xadiga Daryeelka Ilmaha ee Laxaadka La', DCYF waa inay ka heshaa qoraal xaqiijin ah caafimaadka, caafimaadka maskaxda, adeega bulshada ama xirfadle waxbarashada oo ugu yaraan haysta maaster ama kaaliye caafimaad oo duwaan gashan. Xaqiijinta waa in lagu sharaxaa heerka dheeraadka ah ee daryeelka gaarka ah ee looga baahan yahay habdhismeedka daryeelka ilmaha ee ka sareeya waxa loo ansixiyay caruurta aan qabin laxaad la'aanta.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan laxaad la'aanta, waxaa aad ka eegtaa Xeerka 10.5 ee CBA https://ofm.wa.gov/sites/default/files/public/labor/agreements/21-23/nse_childcare.pdf.

Khaladaadka Lacag Bixinta

Mudada ay tahay in adiga ama gobolku uu ku saxo khaladka lacagta iyo inaad ku dalbato in laguu gudo waa:

- Laba sano hadii khaladku uu ku qoran yahay xadiga la siiyo da'da ama deegaanka. Mudadan labada sano ah ma khusayso hantidhawrka federalka, kaas oo noqon kara sadex sano
- Ilaa sadex sano hadii khaladka uu yahay wax kamid ah mushkilad kale

Khaladaadka Lacag yar Siinta

Lacag yar siintu waxay timaadaa maadaama oo khalad ka dhacay qaansheegtaada, hadii aanad helin kharashka wax kasta oo aad ku dalbatay qaansheegta ama hadii lagu siiyay xadi khaldan. Waxa aad raacdaa talaabooyinka hoose:

1. Waxa aad la eegtaa qaansheegtaada duwaankaaga si aad u aragto in magaca ilmuhu uu kasoo baxo qaansheegta
2. Waxa aad is barbar dhigtaa duwaanadaada qaansheegtaada si aad u aragto hadii aan lagu siinin
3. La hadal Khadka Bixiyaha ee 1-800-394-4571 si aad uga warbixiso lacagta yar ee lagu siiyay

Si aad u saxdo lacagta yar ee lagu siiyay, waa inaad gudbisaa qaansheegtaada lacagta oo aad ku sheegeyso adeegyada daryeelka ilmaha mudo aan ka danbaynin sadex bilood kadib taariikhda qaansheegta. Muranka ku saabsan lacagta yar ee la bixiyay waa laga dacwoon karaa. Ka eeg CBA Lifaaca E https://ofm.wa.gov/sites/default/files/public/labor/agreements/21-23/nse_childcare.pdf.

Khaladaadka Lacag Badan Siinta

In lagu siiyo wax ka badan inta ay ahayd in lagu siiyo waxay timaadaama maadaama oo:

- Aanad isticmaalin nidaamka electronic attendance ee DCYF ama aanad lahayn wax laga soo reebay oo laguu ansixiyay
 - Lagaagama baahna inaad duwaanada xaadiriska oo u dhigma duwaankaaga dalabka (WAC 110-15-0034)
 - Waxa aad heshey lacagta xadi khaldan
 - Ma haysatid rasiidh warqad ah oo aad ku xoojiso lacagta aad doonayso
1. Hadii aad ka shakido in lagu siiyay wax ka badan intii aad u aragto in lagu siiyo, la hadal Khadka Bixiyaha ee 1-800-394-4571 ama iimeel u dir providerhelp@dcyf.wa.gov. Iyada ayaa kaa caawin kara

xalinta khaladaadka kahor inta ayna DCYF isla garan in lacagta dheeraadka ah la bixiyay Office of Financial Recovery (OFR).

2. DCYF waxay kormeertaa lacagta daryeelka ilmaha wixii khalad ah ee ku iman kara. Si aad u ogaato hadii khaladku uu saxan yahay, DCYF waxay eegtaa xaadiriska ama waxay kaa dalbanaysaa inaad keento nuqul duwaankaaga aah. Marka ay dalbato DCYF, waa inaad soo gudbisaa risiidhka 45 maalmood gudahood marka aad dalbato. Waxaa muhiim ah in aad ka jawaabto wixii dalab ah ee duwaanada xaadiriska ah. Waxa aad la xidhiidhi kartaa waaxda si aad u dalabto duwaanada adiga oo tixraacaha macluumaadka xidhiidhka ee ku qoran dalabyada.
3. Hadii khaladka la ogaado inuu sax yahay iyo in lacag dheeraad ah la bixiyay, waxa aad ka heli doontaa Wargelinta Lacagta Badan Siinta OFR. Wargelinta waxaa la socda:
 - a. Sababta, nooca lacag siinta badan, caruurta ay khusayso, iyo mudada lacagta dheeraadka ah lagu siiyay
 - b. Tilmaamaha sida aad u gudayso xadiga dheeraadka ah (qorshayaasha lacagta lagu bixinayo ayaa la heli karaa)
 - c. Tilmaamuhu waxay sheegayaan sida looga doodo lacagta dheeraadka ah ee la isasiyay. Waxa aad la xidhiidhi kartaa waaxda sheegtay in lacag dheeraad ah lagu siiyay (ka eeg wargelinta lacagta dheeraadka ah ee lagu siiyay wixii macluumaadkooda xidhiidhka ah) si loo xaliyo, oo waxa aad sidoo kale dalban kartaa Dhagaysiga Maamulka si aad uga muranto lacagta dheeraadka ah ee lagu siiyay. Si aad u dalbato dhagaysi, waa inaad:
 - i. Ku dirtaa dalabkaaga dhagaysiga boosta shahaadada haysata ee leh risiidhka ama qaab kale oo leh risiidh oo aad u dirtaa OFR.
 - ii. Waxa aad xaqiijisa ain dalabkaaga dhagaysiga ay hesho OFR 28 maalmood gudahood oo ka bilaabma taariikhda ay kusoo gaadhay Wargelinta Lacagta Badan Siinta.
 - iii. Waxaa taas kamid ah bayaanka sababta aad u aragto inay khalad tahay lacagta dheeraadka ah ee la sheegey in lagu siiyay oo waxa aad soo raacisaa nuqulka Wargelinta Lacagta Badan Siinta. Hadii aan la xalin lacagta dheeraadka ah ee lagu siiyay marka aad kala hadasho shaqaalaha Khadka Bixiyaha DCYF ama dhagaysuga maamulka, waa inaad gudaal lacagta.
4. Kadib marka Wargelinta Lacagta Badan Siinta laguugu soo diro boosta shahaadada haysata ama adeega shakhsi haaneed, OFR waxay bilaabi doonaa talaabada gurashada lacagteeda kadib ugu yaraan 30 maalmood. Hadii aad dalbato dhagaysiga wax ka badan 28 maalmood kadib marka aad hesho wargelinta, talaabadu ma istaagto inta lagu jiro nidaamka dhagaysiga.
5. Wargelin kasta oo lacagta dheeraadka ah ee lagu siiyay waxaa weeye dhacdo gaar ah. Hadii aad doonayso inaad ka muranto, waxa aad u baahan doontaa inaad dalbato dhagaysi gaar ah mid kasta. Waxa aad heli doontaa wargelinta lacagta dheeraadka ah ee lagu siiyay oo kale adiga oo haysta mid ama dhawr midh oo aad weli sugayso nidaamka dhagaysiga.
6. Muranka ku saabsan lacagta badan ee la bixiyay lagama dacwoon karo. Laakiin, waxaa dhici karta inaad xaq u yeelato inaad dalbato dhageysiga maamulka.

Marka aad gudayso lacagta dheeraadka ah ee lagu siiyay, waxaa muhiim ah in aad wargeliso Tax Desk si aad u xaqiijiso inay la socdaan oo aad wixii isbadal ah ee loo baahan yahay aad ku samayso wixii ku saabsan warbixinta cashuurta. Ka eeg qaybta Macmuulka Cashuurta macluumaadka xidhiidhkooda.

Macluumaadka Cashuurta

DCYF waxay boosta kusoo diraysaa duwaanka bixinta lacagta DCYF oo loo yaqaan Talada Xawilaada. Waxaa ku jira liiska waxyaabaha laga jarayo waa loo adeegsan karo ujeedooyinka cashuurta, oo ay ku jiraan wixii kharash ururada shaqaalaha ah. Hadii qofka ama shirkadu ay doonayso inay xaqiijiso

dakhligaaga, waxa aad siin kartaa talada xawilaada. Qaar kamid ah macluumaadka talada xawilaadu waa sir oo waa in aan cidna la siinin. Waxa uu lamid yahay waraaqaha mushaharka.

Hadii aad u baahan tahay wax kale oo aan ahayn talada xawilaada, waxa aad ka dalban kartaa foomka "cadaynta dakhliga" DCYF. Waxa aad dalabkaaga oo qoraal ah u dirtaa:

SSPS Attn: Evidence of Income
P.O. Box 45812
Olympia, WA 98504-5812

limeylka: SSPSvoe@dshs.wa.gov
Xaqiijinta Mushaharka: 360-664-6103
Wixii W4s ah: 360-664-5833

DCYF kama reebto cashuurta dakhliga lacagtaada DCYF. DCYF waxay dakhliga aad naga heshey anaka kaadhsiisaa Adeegyada Dakhliga Gudaha (Internal Revenue Service, IRS). Waxa aad heli kartaa foomka W-2 wixii ujeedo cashuurta dakhliga ah. Hadii aad qabtid wax su'aalo ah, fadlan la xidhiidh IRS. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan bayaanada cashuurta:

Wicitaanka Bilaashka ah: 833-725-3502, ikhtiyaar 1
limeel: dcyf.taxreporting@dcyf.wa.gov

Ku Xadgudubka Barnaamijka

Sida uu dhigayo WAC 110-15-0277, bixiyayaashu waa inay u hogaansamaan dhamaan masuuliyada ku qoran WAC 110-15-0034, oo ay ku jiraan dalabka munaasabka ah. Hadii aad sidaa samayn waydo waxay keeni kartaa ku xad gudub barnaamijka ah, iyo xayiraad lagu saaro sida ku qoran WAC 110-15-0279.

Ilaha

Macluumaadka Xidhiidhka

| | | |
|--|--|--|
| <p>Ka Warbixinta Tacadiga iyo Dayacaada 1-866-ENDHARM 1-866-363-4276 www.dcyf.wa.gov/safety/report-abuse</p> | <p>Answer Phone for Families <i>Qoysaska loo ogolaaday WCCC ama SCC waxay ka eegi karaan xaalada kiiskooda iyaga oo gujinaya 1 kadib marka ay la hadlaan Xarunta La Hadalka Adeega Macmiilka DCYF</i> 1-844-626-8687</p> | <p>Qaybta Eegista Taariikhda DCYF 1-866-482-4325, ikhtiyaar 4 backgroundcheck@dcyf.wa.gov</p> |
| <p>Xarunta La Hadalka Adeega Macmiilka DCYF <i>Qoysasku waxay dalban karaan adeegyada ama waxay ka warbixin karaan isbadalada</i> 1-844-626-8687 Fakiska: 1-877-309-9747</p> | <p>Xaadiriska Elektorooniga ah ee DCYF 1-844-704-6777 eas.servicedesk@dcyf.wa.gov electronic.attendance@dcyf.wa.gov</p> | <p>DSHS Invoice Express 1-877-461-8855</p> |
| <p>Adeegyada Lagasoo Reebay Liisanka <i>Mushkiladaha ama su'aalaha ku saabsan nidaamka FFN ee la ansixiyay</i> 1-866-482-4325, ikhtiyaar 8 dcyf.ffn@dcyf.wa.gov</p> | <p>Taageerada Xubinta SEIU 925 1-877-734-8673</p> <p>Daryeelka Caafimaadka SEIU 925 1-866-771-7359</p> | <p>Adeega Macmiilka SSPS 360-664-6161 dshs_sspsmail@dshs.wa.gov</p> <p>Daaqada Bixiyaha SSPS 1-855-928-3241</p> |
| <p>Khadka Bixiyaha WCCC 1-800-394-4571 Fakiska: 1-877-309-9747 providerhelp@dcyf.wa.gov</p> | <p>Tilmaamaha Shacabka ee Xafiiska Maamulka (Office of the Superintendent of Public Instruction) <i>Waxay bixiyaan deeq lacageed oo federal ah oo lagu bixiyo cuntada nafaqada leh oo lasoo mariyo</i></p> | <p>Office of Financial Recovery DSHS Economic Services Administration, Office of Financial Recovery, P.O. Box 9501, Olympia, WA 98507-9501 360-664-5700 Wicitaanka Bilaashka ah: 1-800-</p> |

| | | |
|--|---|---------------------------------|
| | <i>Barnaamijka Cuntada Daryeelka Ilmaha (Child Care Food Program)</i> 360-725-6206 | 562-6114 TTY: 1-800-833-6388 |
|--|---|---------------------------------|

Macluumaadka Onleynka ah

- Shuruudaha Liisan Siinta Guriga Daryeelka Ilmaha:
www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/licensed-provider
- Xadiga Child Care Subsidy:
www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/Subsidy_regions_map_chart.pdf
- Shuruudaha iyo Shuruudaha Child Care Subsidy: apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-15
- Macluumaadka Nidaamka Xaafiriska Elektorooniga ah:
www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system
- Tobobarka Nidaamka Xaafiriska Elektorooniga ah:
www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/training
- Qoysku Waxa Uu Ka Dalban karaa: www.washingtonconnection.org
- Macluumaadka Invoice Express:
www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0043.pdfLicensing and Subsidy Rules:
apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110
- Secure Access Washington (SAW): secureaccess.wa.gov
 - Goobta Taageerada: support/secureaccess.wa.gov
- SEIU 925 CBA: ofm.wa.gov/sites/default/files/public/labor/agreements/21-23/nse_childcare.pdf
- Dalabka Xadiga Laxaad La'aanta:
www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/word/Special_needs_request.docx
- Macluumaadka iyo Jadwalka Tobobarka Kharashka Kaabista:
www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/Subsidy_Billing_Training_Schedule.pdf